Human Services
People*first*

Xadidida iyo Daaweynta Injirta

Inta ay carruurtu dhiganayaan dugsiga qoysas badani waxay arkayaan injir. Macluumaadka ku qoran halkan ayaa kugu caawinaya xadidaada iyo daaweynta injirta.

Qaadida Injirta

Injirtu waxay jirtay kumaankun sanno cid kastana way qaadi kartaa injirta iyadoo ay jirto fursada ay injirtu uga tagto madax ee u gasho madax kale kala soocid la'aan.

Injirtu waa cayayaan yar, oo aan garbo lahayn, oo dhiiga jaqa. Midabkeedu wuxuu u kala baxaa kafay cadaan xiga ilaa casaan baroon xigga. Injirtu waxay ku nooshahay oo keliya bani'aadamka. Haddii laga saaro madaxa si dhakhsa badan ayay u dhintaan, badanaa 24 saacadood gudahood.

Dadku waxay u qaadaan injirta marka qof timahiisu gaadhaan qofkale oo injir qaba. Tani waxay dhici kartaa marka dadka ay ciyaarayaan, ay is mucaanaqeeyaan ama meel isu dhow ka shaqeeyaan.

Injirtu ma laha garbo ama lugo ay ku boodo saa daraadeed kama duuli karaan madaxa oo uma duuli karaan mid kale way gurguuran karaan oo keliya.

Raadinta Injirta

Injir badani ma dhaliso cuncun, saa daraadeed waa in aad si taxadar leh u eegtaa si aad u hesho.

Injirta waxaa laga helaa timaha laftooda waxayna aadaan dhalada si ay u quutaan.

Waxay leeyihiin lix lugood oo ku dhamaada cidi si dhif ah ayay uga soo dhacaan madaxa. Ukumaha injirtu (sidoo kale waxaa la yiraahdaa nits) waxaa lagu dhalaa ilaa 1.5cm oo dhalada ah aad bayna ugu dhegan yihiin timaha.waxay metelaan holobta madaxa, laakiin lagama soo daadin karo.

Injintu way gurguuran kartaa oo isqarin kartaa. Sida ugu sahlan ee ugu waxtarsan ee lagu heli karo waa inaad raacdo talaabooyikan:

Talaabada 1 Ku shanlee nooc kasta oo ka mid ah hagaajiyaha timaha oo **qalalan, oo aad shanleysay(ood kala saartay)**. Tani waxay wareerineysaa injirta oo ay ku adkeyneysaa inay qabsato timaha ama ay warwareegto.

Talaabada 2 Hadda ku shanlee qaybo ka mid ah timaha shanlada injirta oo ilko wanaagsan leh.

Talaabada 3 Kaga masax timo hagaajiyaha shanlada warqad ama tirtire.

Talaabada 4 Ka eeg masaxada iyo shanlada injir iyo ukumo.

Talaabada 5 Ku celi shanlada qayb kasta oo ka mid ah madaxa ugu yaraan 4 ama 5 jeer.

Haddii aad aragto injir ama ukun, waa in la daaweeyaa ilmaha timihiisa.

Haddii ilmahaaga dhawaan la daaweeyey waxaad heli doontaa oo keliya qoloftii ukunta oo madhan, waxaa laga yaabaa inaadan u baahan in aad daaweyso maadaama ukumaha madhani laga yaabo inay ka yimaadeen marxaladii hore.

Ukumaha Injirta Madaxa

Ukunta Injirta Madaxu way yar tahay (waa xajmiga madaxa biinka oo kale) wax wareegsan. Ukunta nooli wey boodi marka cidiyaha dhexdooda lagu cadaadiyo.

Ukumaha dhintay waxay leeyihiin dhinacyo isku diisan ukumaha dilaacayna waxay u eg yihiin ukumo yar yar oo la karkariyey oo madax sare laga jaray.

Si aad u siyaadiso waxtarka daaweynta soo saar intii ukuma ah ee suurto gal ah.

State Government Victoria

Shanlooyinka Injirta Madaxa

Shanlooyinka leh ilkaha dhaadheer ee aan mirdhin ee aadka isugu dhow ayaa la ogaaday inay yihiin kuwa ugu waxqabad wanaagsan, si kastaba ha ahaatee, shanlo kasta oo madaxa loogu tala galay waa la isticmaali karaa.

Daaweynta Injirta Madaxa

Madaxa xoogga saar- ma jirto wax cadeyn ah oo ku tusineya inaad u baahan tahay in aad nadiifiso guriga ama fasalka.

Waxyaalaha lagu daaweynayo injirta timaha Waa in lagaarsiiyaa dhamaan **timaha qaybahooda oo dhan iyo dhaladaba.**

Daaweyn dishaa dhamaan ukumaha oo dhami ma jirto saa daraadeed daaweyntu waa inay ku lug leedahay laba jeer in la mariyo toddobo maalmood oo kala dheer.

Ujeedada daaweynta kowaad haddii ay tahay in la dilo dhamaan injirta, daaweynta labaadi waxaa weeye in la dilo ukunta yar ee dilaacday lixda maalmood ee soo socda.

Ku dabool qofka indhihiisa, tusaale shukumaan, marka daaweynta la sameynayo.

Haddii aad isticmaaleyso looshinta, mari timaha oo qalalan.

Shaambada timaha qoo, laakiin isticmaal biyaha ugu yar ee suurta galka ah.

Ka bilow daaweynta dhalada agteeda, adoo isticmaalaya shanlada caadiga ah si aad u marto timaha salkooda ilaa xagga sare. Ku celi tan dhawr jeer ilaa timaha oo dhan aad marto.

Haddii aad doorato inaadan isticmaalin cayayaan dile, waxaa la isticmaali karaa Hagaajisada iyo nidaamka shanlada si maalin dhaaf ah ilaa laga waayo wax injir ah oo nool tobanka maalmood.

Uma baahnid inaad daaweyso reerka oo dhan, ilaa iyaguna qabaan injir mooyee.

Barkinta uunbaa u baahan maydhitaan khaas ah, adigu ku maydh biyo kulul (ugu yaraan 60ºC) ama qalaji adoo isticmaalaya qalajiyaha dharka adoo geynaya kuleylka ama diiranaanta.



Baadhitaanka U adkeysiga

Waxyaalaha injirta madaxa lagu daaweeyaa waxay ka mid tahay qaybahan soo socda midkood iyadoo ay ku xidhan tahay iskudhiska ay ka kooban tahay:

Cayayaan dile dabiici ah (Pyrethrins)

Synthetic Pyrethroids (permethrin iyo Bioallethrin)

Organophosphates (maldison ama malathion)

Geedo, oo ay kujirto ama ayan ku jirin (maadada aan kiimikada lahayn) pyrsthrins.

U adkeysiga cayayaan dilaha waa wax caam ah saa daraadeed waa inaad baadhaa inay injirtu dhimatay, haddii ay dhinteen daawee mar labaad mudo toddobo maalmood ah adoo isticmaalaya isku daawo. Haddii ayan injirtu dhiman daaweyntu waxba ma qaban injirtuna way u adkeysatay daaweynta iyo dhamaan daawooyinka ka kooban isku curiyayaal. Ka maydh daawada u daaweena sida ugu dhakhsaha badan adoo isticmaalaya daawo ka kooban curiye ka firfircoon taas. Haddii ay shaqeyso cayayaan diluhu, injirtu waxay ku dhimanaysaa labaatan daqiiqo gudahood.

Daawo kasta oo injireed waxay dhalin kartaa falgal kiimikaad waana inay u isticmaalaa si taxadar leh dumarka uurka leh ama naaska nuujinaya, carruurta ka yar 12 bilood iyodadka qaba xasaasiyad, neefta ama nabara buka iyo dhalada. Haddii aadan hubin, fadlan weydii dhakhtarkaaga ama farmashiilahaaga.

Ka hortaga Injirta Madaxa

Ma jirto daawo la hayo oo ka hortagta injirta madaxa. Isticmaalida hagaajisada timaha iyo habka shanlada toddobaadkii mar ayaa kaa caawineysa inaad hore u ogaato injirta madaxa wax ka mid ah oo aad yareyso khatarta. Dib u xidhida timaha dheer waxay kaa caawineysaa ka hortaga faafida injirta madaxa.

Sharciyada

Carruurta leh injirta madaxa waxaa laga doonayaa marka loo eego sharciga caafimaadka ee (Cudurada infekshinka leh) in laga saaro dugsiga, xanaano maalmeedka ama xanaano ilmeedka maalmeed. Ilmihii leh injir madax waxaa la daaweyn karaa hal fiid wuxuuna ku noqon karaa dugsiga maalinta ku xigta, xitaa haddii ay weli jiraan ukumo.

Macluumaad dheeraad ah

Macluumaadka ku jira warqadan yar wuxuu ku saleysan yahay baadhitaankii ay sameysay oo uu qortay kalkaaliyaha borofosoorka Rick Speare iyo kooxda baadhayaasha ah ee jooga, dugsiga caafimaadka dadweynaha iyo daawada kulelayaasha, Jaamacada James Cook. Website koodu waa:

http://www.jcu.edu.au/school/phtm/PGTM/hlice/hlinfo1.htm

website yadan soosocda waxay bixiyaan macluumaad dheeraad ah:

http://www.dhs.vic.gov.au/phb/injirta madaxa

Waxaa soo saaray wasaarada adeegyada dadweynaha ee dawlada Fiktooriya, Janaayo 2001 (0500101)